

SAN DIEGO UNIFIED SCHOOL DISTRICT
Office of the Deputy Superintendent

Warbixinada loogu talagalay Waalidka ama qofka masuulka ka ah ardeyda fasalka 8aad ee hesha laba ama in ka badan oo F ah

Go'aanka Guddiga Waxbarashadda

Bishii Janaayo 30 keedii, 2007 waxay Guddiga Waxbarashaddu ansaxiyeen in: "in fasalka siddeedaad lagu ceiyi ardeyga F ka hesha maaddooyinka muhimka ah (kuwaas oo ah Ingirisi, Xisaab, Taariikh, Saaynis) laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2006-07. Waalidiintu waxay diidmo ka muujin karaan in ilmahooda fasalka lagu celiyo, laakiin ardeyga waxaa lagu qori doonaa inuu galo fasalka sagaalaaad ee dugsiya sare oo Barnaamij DhexgelisTA ah lagu sameynayo.

Sharaxaad ku saabsan sida Nidaamkaas loogu dhaqmayo

Halkan hoose waxaa ku qoran sharaxaad ku saabsan sida nidaamkaas loogu dhaqmi doono:

I. Tilmaamaha ku saabsan in Ardeyga Fasalka lagu celiyo - Fasalka 8aad


Ardeyda fasalka siddeed ee ka hesha laba F maaddooyinka muhimka ah, (kuwaas oo ah Ingirisi, Xisaab, Taariikh, Saaynis) laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2006-07, fasalka ayaa lagu celin doonaa. (Jadwalkaas guud ee dugsiyada waxaa heerka fasalka xilli dugsiyeedka ugu horeeya la bilaabi doonaa tirinta "laba ama wax ka badan oo F ah.") Waalidiintu waxay go'aanka heshiiska ah in ardeyga fasalka lagu celiyo ah ku muujineyaan foomka "Ku Celinta ama Ka Gudbinta Fasalka 8aad." Foomka fasal ku Celinta ama Ka Gudbinta wuxuu kale oo muujin doonaa dhammaan ardeyda fasalka lagu celiyey ee lagula taliyey in dugsiya xilliga xagaaga la dhigo galaan.

II. Abiilka Fasal Ku Celinta Ardeyga

Waalidiintu diida in ilmahooda fasalka lagu celiyo abiil ayey gudbin karaan. Abiilkaas waxaa lagu sameyn doonaa foomka "Fasal ku Celinta ama ka gudbinta ee fasalka 8aad", waana in loo gudbiyaa maamulaha ama ku simaha si ay u ansaxiyaan.

Dhammaan ardeyda aan fasalka lagu celinin ee ay waalidkood abiil qaateen waxaa looga baahan yahay inay dugsiya xilliga xagaaga la dhigto iku qoraan. Marka dugsiya xilliga xagaaga la dhigto uu dhammaado:

- Ardeyda aan wax F ah helin waxaa loo gudbineyaa fasalka 9aad ee barnaamijka dugsiya sare ee caadiga ah.
- Ardeyda hesha ama wax ka badan oo F ah waxaa lagu qori doonaa Barnaamijka Dhexgelista lagu sameynayo ee Dugsiya Sare.



*Waalidiintu waxay go'aanka heshiiska ah in ardeyga fasalka lagu celiyo ah ku muujineyaan foomka "Ku Celinta ama Ka Dallacsiinta Fasalka 8aad".

**Waalidiintu waxay go'aanka ga'aanka in ardeyga fasalka lagu celiyo abiilkooda ku muujin karaan foomka "Ku Celinta ama Ka Dallacsiinta Fasalka 8aad".

Somali version: Attach 5a_Parent Info_ML-Spring07